## Haynta iyo Burburinta Diiwaannada EI

Adeeg bixiyahaaga EI ayaa looga baahan yahay inuu haysto diiwaannada EI ee ilmahaaga illaa dhalashada sagaalaad ee cunuggaaga. Adeeg bixiyaha EI wuxuu hayn karaa diiwaanka EI ee cunuggaaga in ka badan tan haddii aadan codsanin in la baabi'iyo diiwaannada kadib dhalashada sagaalka sano ee cunuggaaga.

EI waxay lahaan kartaa diiwaan joogto ah oo ku saabsan magaca cunuggaaga, taariikhda dhalashada, macluumaadkaaga xiriirka, magacyada isku-duwayaasha adeegga EI iyo bixiyeyaasha la shaqeeyay qoyskaaga, iyo xogta ka bixitaanka (oo ay ku jiraan sanadka iyo da'da ka bixitaanka, iyo barnaamij kasta oo la galo wixii ka dambeeya ka bixitaanka) iyadoonu jirin waqti xadidan.

Faahfaahin dheeri ah oo ku saabsan xuquuqahaaga la xiriira diiwaannada EI ee ilmahaaga, kala xiriir DODD taleefanka 614-466-6879 ama ei@dodd.ohio.gov. Faahfaahin dheeri ah oo ku saabsan FERPA, kala xiriir Xafiiska U Hoggaansanaanta Qoyska ee Mareykanka. Waaxda Waxbarashada 202-260-3887.

## Xallinta Khilaafaadka

Haddii aad isku khilaaftaan wax ku saabsan EI, waxaa jira habab badan oo lagu xallin karo. Sida ugu fudud uguna dhakhsaha badan ayaa ah in lala shaqeeyo barnaamijka EI ee deegaankaaga iyada oo loo marayo isuduwaha adeegga EI ama maareeyaha qandaraaska EI ee degmadaada si loogu helo xal khilaafaadka.

Macluumaadka xiriirka isuduwaha adeeggaaga ayaa ku qoran xaashidan waxaadna ka heli kartaa macluumaad kusaabsan hoggaamiyaasha barnaamijka EI ee deegaankaaga websaydhka EI: ohioearlyintervention.org.

Haddii aad doorbideyso inaadan ka dhex shaqeyn barnaamijka EI ee deegaankaaga, waxaad kala xiriiri kartaa shaqaalaha DODD's EI taleefanka 614-466-6879 ama ei@dodd.ohio.gov.

Waxaad sidoo kale u fayl garayn kartaa cabasho DODD oo aad waydiin kartaa waaxda inay baarto cabashada, dhex dhexaadiso, ama qabato dhageysi xaqsoor. Cabashadaadu waa in la saxeexo oo qoraal ay tahay. Waa inay kujirtaa qeexitaan wixii dhacay iyo sharciyada ama xuquuqaha lagu xadgudbay.

Cabashooyinka waa in loo diraa

Ohio Early Intervention
Ohio Department of Developmental Disabilities

30 East Broad St., 12th floor
Columbus, Ohio 43215

## Baadhitaan

Haddii aad rabto DODD inay baarto cabashadaada, waaxdu waxay kaa codsan doontaa macluumaadka adiga iyo bixiyehaaga EI, dib u eegis ku samayn dhammaan macluumaadka la xiriira, oo go'aan kama dambeys ah oo qoraal ah ay kaga gaari 60 maalmood gudahood haddii ay jiraan xadgudubyo loo geystay xuquuqdaada ama Xeerarka EI. Go'aanka kama dambaysta ah waxaa ka mid noqon doona macluumaadka ku saabsan waxa DODD qabatay iyo waxay sameyn doonto si loo saxo wixii dhibaatooyin ah.

## Dhexdhexaadinta

Dhexdhexaadintu waa iskaa wax u qabso adiga iyo bixiyahaaga EI labadaba. Haddii aad rabto inaad adeegsato dhexdhexaadin oo bixiyahaaga EI uu oggolaado inuu ka qaybqaato, DODD waxay soo bandhigi doontaa dhexdhexaadiye xirfad leh oo dhexdhexaad ah oo kormeeraya hawlaha. DODD ayaa bixisa kharashka dhexdhexaadiyaha, dhexdhexaadintuna waa inay noqotaa mid ka dhacda meelaha iyo waqtiyada ku habboon kaqaybgalayaasha.

## Dhageysiga Nidaamka Xaqsoorka

Dhageysiga nidaamka xaqsoorka waa qaabsocod rasmi ah. Waxaad shaqaalayn kartaa garyaqaan si uu kuu metelo, laakiin tani shuruud ma aha.

Dhageysiga nidaamka xaqsoorka, sarkaalka dhageysiga nidaamka xaqsoorka ayaa dib u eegi doona cabashada, dhageysanaya kaqaybgaleyaasha, dib u eegaya macluumaadka dheeraadka ah, oo bixinaya doonaa go'aan qoraal ah 30 maalmood gudahooda laga soo bilaabo markii cabashada la helay. DODD ayaa bixisa kharashka sarkaalka dhageysiga nidaamka xaqsoorka, dhageysiguna waa inuu ahaadaa mid ka dhaca meelaha iyo waqtiyada ku habboon kaqaybgalayaasha.

Booqo ohioearlyintervention.org/federal-and-state-regulation si aad wax badan uga ogaato IDEA iyo qawaaniinta gobolka ee barnaamijka EI ee Ohio.

Isuduwahayga adeegga EI:

______________________________

Macluumaadka xiriirka: ______________________

Ohio Department of Developmental Disabilities

Help me grow



# OHIO Early Intervention

# Xuquuqda Waalidka

## *Hordhaca*

Waalidiinta dhalay carruurta ku jira Wax-ka-qabadka Hore (EI) waxay leeyihiin xuquuq iyo ilaalino fara badan marka loo eego Sharciga Waxbarashada Shaqsiyaadka Naafada ah (IDEA).

Waaxda Ohio ee Naafooyinka Koboceed (DODD) iyo la-hawlgalayaasha maxalliga ah ayuu ka kooban yahay nidaamka EI ee Ohio waxayna mas'uul ka yihiin hirgelinta xuquuqdan iyo ilaalintan. Intooda badan waxay codsadaan xitaa haddii ilmahaaga la ogaado in aanu u qalmin EI.

Buug-yarahaan wuxuu siinayaa qoyskaaga macluumaad ku saabsan xuquuqahaas iyo ilaalinahaas iyo sidoo kale waxa la sameeyo haddii aad dood ka qabtid wax ku saabsan EI. Foomamka loo adeegsaday EI waxay si faahfaahsan u sharraxaan xuquuqahan iyo ilaalinahan. Intaas waxaa sii dheer, isuduwaha adeeggaaga ayaa waliba sharxi doona oo ka jawaabi doona wixii su'aalo ah ee aad qabtid.

## *Ogeysiiska Qoraalka ah ee Hore iyo Oggolaanshaha*

Waxaad heli doontaa macluumaad kusaabsan waxqabadyada qaarkood ee ay gaarsiisay nidaamka EI waqtiga kahor iyo iyagoo qoraal ah. Tani waxaa loo yaqaan "ogaysiis hore oo qoraal ah." Ogaysiiska hore ee qoraalka wuxuu ku siinayaa waqti aad ku go'aansato haddii aad rabto inaad gasho waxqabad gaar ah. Haddii aad diyaar u tahay inaad hawsha bilawdo isla markiiba, waad iska dhaafi kartaa muddadan sugitaanka. Markaad go'aansato inaad gasho waxqabadyada qaar, waxaad siin doontaa rukhsaddaada oo qoraal ah.

Ruqsaddaan waxaa loo yaqaan "oggolaansho." Oggolaanshahaaga waa wax iskaa ah oo waa laga noqon karaa wakhti kasta. Nidaamka EI-ga wuxuu hubin doonaa in su’aalahaaga ku saabsan waxqabad kasta laga jawaabay ka hor intaadan bixin oggolaanshahaaga. Fadlan weydii isuduwahaaga adeegga ama qof kasta oo kale ee kaala shaqeeya EI wixii su'aalo ah ee aad qabtid. Ogaysiiska hore ee qoraalka ah iyo ogolaashaha ayaa quseeya

- Baadhitaano koboceed,
- dabagalka ilmaha,
- qiimaynaha ilmaha iyo qoyska,
- go'aan ka gaaridda u qalmid la'aanta,
- iyo bilowga ama beddelaada adeegyada Qorshahaaga Adeegga Qoyska ee la Khaasyeelay (IFSP).

Intaas waxaa sii dheer, waxaad heli doontaa ogaysiis hore oo qoraal ah markasta oo adeeg kujira IFSP-gaagu dhammaado ama aad ka baxdo EI.

Xaaladaha qaarkood kuma lug yeelan doonaan ogaysiis hore oo qoraal ah, laakiin oggolaanshahaaga ayaa wali loo baahan yahay ka hor inta aan nidaamka EI uu buuxin ficillada qaarkood. Nidaamka EI waa inuu helaa oggolaanshahaaga kahor

- la wadaagga macluumaadka ku saabsan qoyskaaga meel ka baxsan nidaamka EI, oo ay ku jiraan dugsiga deegaankaaga degmada ama dhaqtarka carruurta;
- qabashada shir qorshaynta kala-guurka;
- ama u adeegsiga caymiskaaga guud ama gaar ahaaneed si loogu bixiyo adeegyada EI.

Waa muhiim inaad ogaato in dabagal ama qiimeyn carruur loo baahan yahay kahor intaanu kuu adeegin nidaamka EI. Haddii aadan oggolaan dabagalka ama qiimaynta ilmaha, ilmahaaga u adeegi maayo nidaamka EI.

## *Diiwaannada EI iyo Asturnaantaada*

Sababta oo ah nidaamka EI wuxuu heli doonaa macluumaad fara badan oo ku saabsan adiga iyo cunuggaaga, waxaad leedahay xuquuqo la xiriira diiwaannada ay haysay nidaamka EI. Diiwaanadan waxaa ka mid ah macluumaadka ku saabsan dabagalka iyo qiimeynta, macluumaadka caafimaad ee la xiriira u qalmidda ilmahaaga ee EI, adeegyada IFSP-daada, nuqulo ama asalka foomamka EI ee aad buuxisay oo aad saxiixday, iyo dukumiintiyada xiriirka inta u dhaxaysa adiga iyo bixiyeyaashaada EI. Dhammaan macluumaadkan waxa uu qayb ka yahay diiwaanka EI ee cunuggaaga.

Waxaad leedahay xuquuq badan oo la xiriirta diiwaanada EI ee qoyskaaga. Kuwaas waxaa ka mid ah xaqa aad u leedahay inaad

- codsato nuqulada diiwaanka EI ee ilmahaaga,
- eegto oo dib u eegto diiwaannada EI ee ilmahaaga 10 maalmood gudahood taariikhda codsigaaga;
- wakiil uu eego oo dib u eegis ku sameeyo diiwaannada EI ee ilmahaaga;
- hesho sharaxaad iyo fasiraado diiwaanka EI ee ilmahaaga;
- haysato liis noocyada iyo goobaha diiwaannada EI ee la ururiyey, la xafiday, ama la adeegsaday;
- codsato in bixiyaha adeegga EI uu wax ka beddelo diiwaanka EI ee ilmahaaga;
- oo aad hesho dhageysi nidaamka xaqsoorka haddii adeeg bixiyaha uu diido inuu wax ka beddelo diiwaanka EI ee ilmahaaga.

Wax lacag ah lagaa qaadi maayo dabagalka ama qiimeynta elektiroonig ah ama warqadda ah ee ku saabsan ilmahaaga, qiimeynta ku saleysan qoyska, iyo qorshaha IFSP 10 maalmood gudahood ka dib kulan kasta oo IFSP ah. Wax lacag ah lagaama qaadi doono si aad u baadho ama aad u soo hesho diiwaankaaga EI; Si kastaba ha noqotee, adeeg bixiyahaagu wuxuu kugu soo dallaci karaa ujro nuqulada diiwaanka EI ee adiga laguu sameeyey ilaa inta ujradu aysan si muuqata kaaga hor istaagaynin adeegsiga xuquuqda aad u leedahay inaad baartid oo aad dib u eegto diiwaannadaas.

Sababtoo ah dabeecada gaarka ah ee macluumaadka diiwaankaaga EI, dadka ka shaqeeya nidaamka EI ee marin u leh macluumaadkaas waa inay u xafidaan si gaara. Hay'adaha xafida diiwaannada EI ee ku saabsan qoyskaaga waa inay hayaan liistada noocyada iyo goobaha diiwaannada EI ay aruuriyaan oo ay hayaan. Dadka ku jira nidaamka EI ee marin u heli kara diiwaankaaga EI ayaa kaliya u sheegi kara macluumaadkaaga shakhsiga lagu garan karo (PII) dadka kale ee ka shaqeeya nidaamka EI oo kaliya ah ilaa inta lagama maarmaanka u ah siinta adeegyada EI qoyskaaga. Haddii aad rabto in PII-gaaga lala wadaago meel ka baxsan nidaamka EI, waa inaad marka hore bixisaa oggolaanshahaaga.

Si kastaba ha noqotee, Sharciga Xuquuqda Waxbarashada iyo Asturnaanta Qoyska ee 1974 (FERPA) wuxuu u oggolaanayaa adeeg bixiyahaaga EI inuu bixiyo PII isagoon waalidku oggolaan xaaladaha qaarkood. Kuwaas waxaa ka mid ah

- Hay'ad kasta ama qof kasta oo uu magacaabay Hantidhawraha Guud ee Mareykanka, Xeer Ilaaliyaha Guud ee Mareykanka Xoghayaha waxbarashada, ama maamul gobol ama deegaanka hay'adda waxbarashada u qaabilsan inay qabtaan xisaab hubin kasta, qiimeyn, u hoggaansan, ama waxqabad fulin ah oo la xiriira shuruudo kasta oo federaal ah oo la xiriira barnaamij kasta oo waxbarasho oo federaalka ama gobolku taageero;
- shaqaalaha kiis ee hay'ad ama wakiil kale oo ka socda hay'ad daryeelka ilmaha gobolka ama deegaanka marka qofkaasi sharci ahaan mas'uul ka yahay daryeelka iyo ilaalinta ilmaha;
- maxkamad ka jawaabaysa amar maxkamadeed oo la soo saaray ama amar garsoor;
- ama sarkaal ku habboon oo la xiriira xaalad deg-deg ah oo caafimaad ama badbaado.

Markii qof ka baxsan nidaamka EI uu galo diiwaankaaga EI, hay'adda haysa diiwaanka waa inay haysaa dukumiintiyada cidda heshay diiwaanka, goorta iyo ujeeddada.

Julaay, 2019